

# TILMAAMAHA DUKHAANKA SARIIRTA

*Ka hortagga iyo Tirtirida*

Hagahn waxa uu bixiyaa macluumaadka ku saabsan sida loo arko oo loo tirtiro dukhaanka sariirta.

**Magaalada Boston**

*Adeegyada Baadhitaanka*

2305-01

# WAA MAXAY DUKHAANKA SARIIRTU?

Dukhaanku waa wax yar oo aan baa lahayn, dulin quuta dhiiga oo soo mara marxalado saddex ah oo nolosha, ukun, mid yar, iyo mid wayn. Xabada yar ee dilaacday waxay leegtahay siidh aad u yar iyo midab khafiid ah ilaa ay quud hesho. Midka wayn waxa uu leeyahay oo qaabkiisuna yahay siidhka tufaaxa, madow buni  casaan ah midabka oo si man yahay sida kaadhka kiridhitka ka hor quudinta. Cayayaankan waxay ku dhuuntaa meelo aan lagu dhibin oo ay ku jiraan, halka dadku seexdo ama fadhiisto muddo wakhti aad u badan.

Celcelis ahaan dukhaanka sariirtu qiyaas ahaan waxa uu noolaadaa 10 bilood. Dukhaanka sariirka dhedig waxay dhalaan hal ilaa shan ukun ah maalintii, waxay u koraan dukhaan wayn 21 maalmood gudahood oo waxay noolaan karaan bilo badan iyagoon helin waxay quutaan. Goobaha uu aadka ugu badan yahay dukhaanka sariirta waxaa laga heli kara ameel kasta gudaha guriga.

Dukhaanka sariirta ee dhiiga ka gelinta afkooda dhuuban si toos ah maqaarka iyagoo baadhaya xidida dhiiga ee ytar oo waa ay dhaqaaqi karaan oo u qaniinaan si soo noqnoqta. Meel kasta oo afka dhuuban waxa uu sii daayaa candhuuf ka kooban barootiin iyo dheecaano maqaarka taas oo sababi karta falcelinta xasaasiyada leh dadka qaarkooda. Falcelinta xasaasiytadu way kala duwanaan karaan cuncun yar oo casaan ah ama ka soo bax cad, meel biyo galeen ama meel jidhka oo dheecaan galo.

### WAA MAXAY KHATARTA LAHAANSHAHA DUKHAANKA SARIIRTA

Dukhaanka sariirta caabuqa weligeed ma muujin inay iskaga gudbaan aadamaha. Si kastaba ha ahaatee, astaanta ugu badan ee qaniinyada dukhaanka sariirta waa barar yar oo cuncun ku leh maqaarka. Khatarta ayaa ka iman karta isticmaalka sunta cayayaanka si loo daweeyo guriga, gaa rahaan marka dadku ay isku dayaan inay tirtiraan dukhaanka sariirta iyaddoon lahayn caawimo ama talo maareeyaha xirfad yaqaanka cayaanka.

Dadka aan lahayn khibrada adeegyada sunta cayayaanka waxay sameeyaan isticmaalka sunta buufinta ah iyo alaabta xirfadeed si loo xakameeyo dukhaanka sariirta guryahooda. Saamaynta caafimaadka dad waynaha ee sunta cayayaanka oo aad ugu badaray loona isticmaalay xakamaynta dukhaanka sariirta lama garanayo si kastaba ha ahaatee, waxaanu si xoogan u joojinta isticmaalka "sunta cayayaanka lagu dilo" ee yaryar sababtoo ah gaadhida waxyeelada leh iyo khatarta qaraxa qalabka.



# KUMAA KA MASUULK AH KA SAARIDA DUKHAANKA SARIIRTA GUDAHA GURIGA?

Badanka xaaladah, mulkiilaha guriga ama maareeyaha dhismaha waxa u baahan sharciga "si loo siiwado degeneenta guriga ay leeyihiin iyaddoonay ku badan cayayaanka" (MA: 105 CMR 410.550). Haddii aad tahay kirayste, la xidhiidh mulkiilahaaga markaas waxay shaqaalayn karaan tirtire ruqsad haysta si loo aqoonsado cayayaanka oo loo sameeyo qorshaha tirtire ama IPM (Maaraynta Isku Dhafan ee Cayayaanka) si iyaga loo tirtiro.

Fadlan ogow: Haddii qof uu kiraystay guri keliya oo qoyska ah, mulkiilahu kama masuul aha tirtirida ilaa inta ay ilaaliyaan dayactirka guriga. Xaaladahan, qofka guriga ku jira waxaa looga baahan yahay inuu shaqaalaysto shirkada maaraynta cayayaanka

### MASUULIYADAHA DHISMAHA MAAMULKA IYO SHAQAALAHA:

- Ku dhiirigeli kiraystayaasha ama martida si looga warbixiyo dukhaanka sariirta (aan laga warbixiyay ama aan la xakamayn faafida waxay u fekeri doonaan si degdeg ah
- Ilaali diiwaanka dukhaanka sariirta (ama cayayaan kale) abashooyinka
- Degdeg uga jawaab cabashooyinka
- Horumari borotokool adag oo ah tirtirida hadaf ahaan
- Bilw barnaamijka ka hortagga ah, xooga saaraysa wacyi gelinta

### MASUULIYADAHA KIRAYSTAHA:

- La shaqee shaqaalaha iyo maaraynta gudaha ka hortagga iyo xakamaynta dukhaanka sariirt ahaddii meesha gaarka ah ee aad ku nooshay uu ku badan yahay dukhaan ama aanu ku badnayn.
- Garo calaamadaha dukhaanka guriga oo si joogta ah u hubi calaamadahooda gudaha meeshaada nolosha
- Warbixinta faafida dukhaanka



# TALLAABOOYINKA

## TALLAABADA 1: U DIYAAR GAROWGA - WARAYSIGA KIRAYSTAHAAHA

Tallaabooyinka koowaad waa in la waraysto dadka degen guriga si loo go'aamiyo goobaha suuragalka ah ee faafida dukhaanka. Waydii su'aalaha soo socda:

**1.** Qofkee gudaha guriga ayuu qaniinay kutaanta guriga? Miyay qaniinyooyinka la arki karaa?

**2.** Halkee dadka ay saamaysay seexdaan ama ku nastaan muddada dheer gudaha guriga?

**3.** Miyaa guryaha jaarka ah ay ku jiraan dukhaan?

**4.** Miyaa wax kuraas kasta ah, kuwa cusub ama kuwa dhawaan la isticmaalay lagu soo diray guriga?

**5.** Miyaa qof jooga qoyska ku jiray safar ama booqashada u baahnayd shandada?

**6.** Halkee la saaray shandada marka laga soo noqonayo booyashada?

**7.** Halkee hadda la dhigay shandadaha?

**8.** Miyuu qof kasta oo kale la soo booqdaa guriga shandado, koodhadh ama sheeyo kale?

**9.** Ma jiraan wax xawayaan rabaayad ah gudaha guriga iyo, haddii ay taasi jirto, halkee ayaad caadi ahaa seexataa ama ku nasataa?

**10.** Tallaabooyinkeed xakamaynta ayaa laisku d eyay?

## TALLAABADA 2: BAADHITAANKA HORE

Ujeedada baadhitaanka waa in la go'aamiyo haddii dukhaank sariirtu joogaan iyo heerka ilaa sida ay ugu bateen. Haddii wakhti kasta dukhaanka sariirta la helo, kula tali macmiilka doorashooyinka daawaynta oo bilow nidaamyada xakamaynta. Maareeyaha xirfad yaqaanka ah ee cayayaanka waa inuu u diyaar ahaadaa baadhida dilaacyada iyo kala jeexyada, iyo kala dhigista kuraasta, ka saaraa looxaanta gidaarka racsan, sare u qaadaa rooga, ka saaraa muraayadaha iyo daboolada godka korontada, oo xidhaa oo xakamayeehaa sheeyada cayaanku ku batay iyo kuraasta iyo sariiraha.

Bilow baadhitaanka halka qofka ay saamaysay uu joogo ama seexdo (caadi ahaan sariiraha, kuraasta buushka ah iyo kuraasta) raadinta dukhaanka, nooca maqaarka iyo araga saxarada. Baadhitaanka sariirta waa inuu aad u faahfaahsanaadaa, oo waxaa ku jiri doona go'ayaasha, bustayaasha, barkimooyinka, furaashyada, isbiriinka bogoska, looxa madaxa iyo fareemka. Sariirta waa lakala saaraa, la baadhaa oo la saara badhtan ahaan guudka sagxada. Dukhaanka sa riirtu waxa uu ku dhuuman karaan dilaacyada iyo kala jeexyada, ay ku jiraan godadka loo qoday masaabiirta. Isbiriinada bogoska iyo fareemada sariirta ay ku jiraan tolida, hoosta cidhifka ilaalinta, ka dambeeya daboolka boodhka ("galka joodariga") iyo dhammaan meelaha ay iska xidhmaan iyo dilaacyada waa in la baadhaa.

Marka xigta, ballaadhi raadinta si loogu daro dhammaan kuraasta, looxa gidaarka, rooga, qalabyada iyo daahyada, iwm.

### FADLAN OGOW

Qaybaha badan ee guriga, haddii dukhaanka sariirtu yahay hal meel, dhammaan qaybaha ku dhegan (ay ku jiraan kuwan si toos u sareeya iyo kuwa hoos) waa in la baadhaa.

## TALLAABADA 3: SIDA LOO HELO XIRFAD YAQAANKA XAKAMAYNTA CAYAYAANKA

Qaabka ugu wanaagsan ee loo tirtiro dukhaanka guriga waa in la shaqaaleeyo shirkada xakamaynta cayayaanka oo leh waayo aragnimada xakamaynta dukhaanka sariirta.

Ruqsada cayayaanka ee ganacsiga waxaa loogu baahan yahay in la daweeyo dhammaan guryaha gaarka ah iyo kuwa dad waynaha ee aadamahu ku jiraan ee afar iyo qaybo guryo ka badan ah (Xeerka Xakamayntsa Cayaanka Massachusetts Cutubka 132 B ee Sharciga Guud ee Massachusetts). Keliya sunta cayayaanka ay ku taalo calaamada Commonwealth of Massachusetts ee lagu isticmaalo dukhaanka sariirta si sharci ah ayaa loo adeegsadaa.

Ka hor la xidhiidhka shirkada maamulka xayayaanka, waa inaad ogaataa halka aagagaaga dhibaatadu yihiin iyo waxya yihiin cayayaanka aad leedahay, markaas waxaad shaqaalayn kartaa qofka ku habboon. Haddii aad ku aragtay cayayaanka gudaha guriga, qoraal ka samee waxay u eeg yihiin iyo dhammaan meelaha aad ku aragtay. Tani sidoo kale waxay u oggolaan doontaa shirkada aad shaqaalayso adeega ugu suuragal san.

Samaynta cilmi baadhidu waxay kaydin kartaa lacag oo waxay ka hortagtaa cayayaanka inay guriga ku bataan. Ka hor inta aanad shaqaalay xirfad yaqaanka xakamaynta cayayaanka, waxaad rabtaa inaad ka hesho qayb macluumaadka ah markaas adiga aad ayay kuugu shaqaynayaan. Haddii ay suuragal tahay google ka baadh sifooyinka cayayaanka iyo sida loo aqoonsado. Tani waxay caawin doontaa xakamaynta cayayaanka marka aad raadinayso adeegyadooda.

Intaa waxa dheer waxaanu ku talinaynaa inaad raacdo tallaabooyinka ku qoran hoos:

- Soo wac dhowr shirkahadaha ruqsada hasyta iyo maaraynta cayayaanka caymiska ku jira oo ka hel qiyaaso qoran.
- Hubi tixraacyada.
- Raadi shirkadaha bixiya labbadaba xakamaynta kimikada iyo kuwa aan kimikada ahayn.
- Siiw ad hore u baadhida sidiiq ayb ka mid ah nidaamka qiyaasta.
- Farsamayaaqanadu waa inay u diyaar ahaadaan inay kaala hadlaan wax ku saabsan doorashooyinka daawaynta iyo damaanadaha.
- Qorshaha xakamaynta dukhaanka sariirta waainay qaataan daawayn badanka iyo baadhitaanada. Hubso in kuwan la daboolo gudaha qiyaasta.
- Is barbar dhig damaanadaha.

## TALLAABADA 4: DHAQAMADA UGU WANAAGSAN EE LAGU XAKAMAYNAYO DUKHAANKA SARIIRTA

Sunta cayayaanka oo keliya waainaan la isticmaalay si loo xakameeyo dukhaanka sariirta. Barnaamijka ugu waxtarka badan ee tirtirida dukhaka sariirta waa mid adeegsada habka Maaraynta Cayayaanka Isku dhafan (IPM). IMP waa isticmaalka dhammaan qaababka suuragalka ah qaab isku xidh ah oo yareeya khatarta gaadhida sunta cayayaanka, ilaalinta deegaanka, oo yareeya waxtarka. Intaa waxa dheer, waxaa lagu talinayaa in xarumahu ay leeyihiin qorshaha maaraynta cayayaanka oo diyaar ah si wax looga qabto cayayaanka ka hor ina aanay noqon dhibaato.

Qaababka IPM waxaa ka mid ah:

- Baadhida aagaga cayayaanku ku badan ayahay, lagu daray hareeraha meelaha lagu nool yahay.
- Aqoonsashada cayayaanka
- Hayd diiwaanada taariikhda iyo goobaha halka cayayaanka laga helo
- Nadiifi dhammaan sheeyada
- Yaree alaabta iska dhextaala halka dukhaanka sariirta uu ku dhuuman karo
- Si feejigan u isticmaal sunta cayayaanka si waafaqsan tilmaamaha calaamada
- Same baadhitaanada la socodka ah iyo daawaynta
- Sare u qaad wacyi gelinta waxbarashada lagu bixiyo ka hortagga dukhaanka sariirta

Xarunta wayn waxay u baahan kartaa dhowr wareen oo baadhitaanada ah, nadiifinta, iyo ku shubida sunta cayayaanka ka hor dukhaanka sariirta intaan si buuxda loo tirtirin. Si fudud u daadinta sariiraha iyo dharka sariiraha MA aha hab wanaagsan ee maaraynta dukhaanka sariirta. Dukhaanka sariirta waxay u faaftaa si degdeg ah, caaryada, qalabka nalka, qalabayada korontada ku shaqeeya iyo looxaanta sagaxada. Haddii aad go'aan ku gaadho inaad daadiso kuraasta iyo alaabta hubsto inaad burburiso oo aad xumayso qaabka sheeyada si looga hortaggo qof kale isagoon garanayn inay qaataan sheeyada dukhaanka leh.

## TALLAABADA 5A: DIYAARINTA QOLKA

Diyaarinta qolka daawaynta dukjaanka sariirtu waa lama huraan si loo tirtiro cayayaanka badan. Maareeyayaasha cayayaanku waxay diyaarinayaan in la qabto baadhitaanka ka hor nadiifin kasta ama tirtiridu bilaabantay. Tani waxay saamaysay maareeyaha cayayaanka eegmada xadka buuxda ee dhibaatada. Marka dukhaanada sariirta la helo iyo inta ay leeg tahay dhibaata go'aan laga gaadhay, diyaarinta qolka waa in la sameeyo. Kuwa soo socda waa tallaabooyinka diyaarinta qolka la soo jeediyay:

- Ka saar dhammaan go'aayasha sariirta, daahyada yaryar/daahyada ee qolka iyo waxa ala saaraa kiishash gaadiida ilaa goobta dhar maydhka.
- Kabadhada madhan iyo kabadahda gidaarka oo ku rid alaabta baco. Ku rid dhammaan dharka iyo koodhadhka kiishashk si loogu qaado doobiga.
- Kiish boombalooyinka caaga ah, buuggaagta, qalabka korontada ku shaqeeya, iyo shay kasta oo aan la dhaqi karin waa in loo soo xidhaa si gooni ah si loo baadho.
- Qolka waa inuu ka madhnaadaa dhammaan dharka iyo sheeyad amarada. Haddii ay suuragal tahay, barkimooyinka kuraasta waa in laga saaro oo la dhaqo.
- Dhaqaaji kuraasta ugu yaraan 18 hiish in ka fog gidaarada.
- Ka saar daboolka godadka iyo bilaydhada iswiijyada dhammaan gidaarada.
- Fareemada sawirka waain laga saaraa gidaarada oo la nadiifiyaa ama la daaweeyaa.
- Dadka iyo xawayaanka rabaayada ah waa inay ka tagaan aaga muddada daawaynta oo sugaan wakhtiga la sheegay ka hor inta aanay dib u soo gelida, ilaa caadiga ahaan afar saacadood
- Ku dabool taangida kalluunka tuwaal ama dabool caag ah.
- Dhammaan dharka, go'yaasha iyo sheeyada kale waa in la nadiifiyaa (oo aan lahayn dukaanka sariirta) oo meel gooni ah la dhigo ilaa macmiilka loo qaado qol cusub , goobta, ama ilaa dhibaatada dukhaanka sariirta laga tirtiro.
- Hubso in xirfad yaqaanka xakamaynta cayaanu awoodo inuu baadho oo dawooyo dhammaan kuraasta iyo sariiraha.
- Ka qaado alaabta guriga iska taala  Waa suuragal in la tirtiro dukhaanka sariirta iyaddoon laga qaadin alaabta iska taala.



## TALLAABADA 5B: DIYAARINTA QAYBTA MADHAN

Dukhaanka sariirtu gudaha guryaha madhan maaha keliya dhibta xakamaynta laakiin arrin sharci sababtoo ah ma damaana qaadi kartid inay si buuxda uga xor tahay dukhaanka sariirta (aan ka ahayn isticmaalka kimikada ku uuminta ah).

Markaas, sideen u kirayn kartaa mar kale? Haddii aad keliya isticmaalayso daawaynta dhaqanka ah si wax looga qabto qayb guri oo madhan oo dukhaan leh, ka feker mida soo socota:

- Dukhaanka sariirtu waxa uu noqday mid aan socon marka wax marti ah aanu joogin oo ma gaadhi karo oogooyinka sunta cayayaanka lagu buufiyay
- Ma jiro qalabka ka warhaynta dukhaanka sariirt aoo la isku halayn karo si loo isticmaali marka qofka martida ah aanu joogin
- Dukhaanka sariirtu waxa uu u socon karaa guryaha ku dhegan isagoo raadinaya cunto

Xalka ugu wanaagsan waa in la daweeyo qaybta guriga si xoogan. Shirkadaada maamusha cayayaanka waxay daloolin kartaa meelaha banaan ee  gudaarka oo waxay ka saaraysa looxada gidaarka ku dhegen iyo jebiska siliga si loo daweeyo goobahan leh boodhka. Sidoo kale waxaa loo adeegsan karaa daawaynta buuxda ee sunta cayayaanka dilaacyada iyo meelaha kala dilaacsan. Guryaha ku dhegan sidoo kale waa in lala socdaa. Haddii aan la helin dukhaanka sariirta ka dib saddex baadhitaan/daawaynood, labba todobaa ukala qaybi (haa, lix todobaad), iyo dhammaan dedaalad daawaynta iyo natiijooyinka baadhida la qoray, waxay ahaan kartaa in guriga mar labbaad la kiraysto.

Si kastaba ha ahaatee, u diyaar ahow inaad isla markaaba ka jawaabto haddii qofka degen ee cusub uu soo xareeyo cabasho. Beddelkeed, dabaqa waa in lagu baadhaa eyga baadhida urta (eyga uriya dukhaanka sariirta). Isticmaalka ey tababaran si uu u baadho dukhaanka badan ee sariirtu waa qaab wanaagsan oo lagu go'aamiyo haddii dukhaanka sariirtu weli ay joogo ama aanu joogin. Eydan waxay sheegi karaan faraqa u dhexeeya dukhaanka nool iyo ka dhintay, oo caadi ahaan waxay ogaan karaan xataa ukunta yar ee keliya dukhaanka sariirta. Si kastaba ha ahaatee, hadda waxaa jira keliya dhowr ey oo loo heli karo ujeedadan. Markaas, kiraysashada eyga khirada leh ee dukhaanka iyo qof la socda wixii ah ujeedooyinka baadhitaanka dabaqa waxay noqon doontaa qaali .



### TALLAABADA 6 - FILASHADA XAKAMAYNTA

Markaad filan karto in tirada dukhaanka sariirta si wayn ay u yaraatay ka dib daawaynta hore, macquul maaha in la filo in ay dhammaan tageen. Dhab ahaan, dukhaanka sariirta waxa dhici karta inuu xataa si aad ah u muuqdo 24 saacadood ee koowaad ka dib daawaynta sababtoo ah way jiran yihiin oo waxay u soo baxaan oo ka noqdaan meelaha laga arki karo. Haku dawayn dukhaankan sunta cayayaanka, labbada maalmood ee xiga dukhaanka sariirta waxa uu bilaabayaa u dhimashada tiro badan.

Si kastaba ha ahaatee, xataa haddii dukhaanka u muuqdo inaanu muuqan todobaad ka dib daawaynta hore, daawaynta la socodka ah waxay u baahan yihiin in lagu sameeyo labba todobaad si loo dilo kuw ayaryar ee dilaacay muddada ay kala go'nayd daawayntu. Ka dib daawaynta iyo labbada la socod, haddii kiraystaha aanau arag wax dukhaanka sariirta ah oo aanay waxba la qaniinin, tirada badan ee dukhaanka waxaa looga fekeri karaa kuwa la xakameeyay.

Nasiib daro, ma jirto damaanada dukhaanka sariirta si buuxda ayay u tagaan, markaas qofka degen waxay sii wadi doonaan inay u feejignaadaan dukhaanka sariirta. Haddii dukhaanka badan yahay, dawooyin badan oo la socodka ah ayaa loo baahan doonaa, laakiin qofka ma saadaalin karo inta ay tahay. Deegaanka is dhexyaala halka dad waynaha ay joogeen hal sano ama in ka badan dhismaha waxay u baahan doonaa in uumi lagu shido.

Xaaladahan, cabudhinta tirada, markaas qofka kiraystaha si joogta ah looma qaniino, waxay noqon kartaa mida ugu wanaagsan ee looga guul gaadho xataa haddii booqashooyinka la socodka ay u sii socdaan si aan xadidnayn. Xaaladahan, waa muhiim in maamulka dabaqa iyo qofka degen yeeshaan filashooyin dhab oo ah waxa ay yihiin tallaabooyinka la qaadi doono ama aan la qaadi doonin.



# SU'AALAHA INTA BADAN LA IS WAYDIIYO

### NOOCEE SUNTA CAYAYAANKA AH AYAAN ISTICMAALI KARAA?

Dukhaanka sariirta waxay noqonayaan kuw aiska caabiya suntada cayayaanka. Sunta cayayaanka laga heli karo dukaanada si loogu isticmaalo guryaha badanka waxay dili doonaa dukhaanka saiirta marka toos loogu buufiyo dukhaanka.

Sidoo kale, weligaa haku shubin sunta cayayaanka guudka furaashyada ama kuraasta buushka ama halka carruura iyo xayawaanka rabaayada ah ku ciyaaraan. Waxxaanu ku talinaynaa inaad u dayso ku shubida sunta cayayaanka hawl wadeenka xakamaynta cayaanka ee ruqsada haysta.

### MIYAA SUNTA BUUFINTA CAYAYAANKA AMA SUNTA LAGU BUUDIYAA WAXTARTAA?

Maya, alaabtan waxay ku faafi kartaa kimika khatar ah ilaa gurigaaga oo waxba kama tarto dukhaanka sariirta. Waxyaabaha dukhaanka lagu buufiyo dhab ahaan waxay ka sii daraan dhibaatada sababtoo ah waxay sababi karaa dukhaanka sariirtu inuu ku faafo aagaga kale ee guriga.

### MIYAAN U BAAHANAY INAAN TUURO FURAASHYADAYDA IYO KURAASTA?

Maya, tuurida furaashkaaga ama kuraasta ayaa xalin doonta dhibaatada dukaanka sariirta. Haddii dukaan saaran yahay furaashkaaga ama joodariga ama kursiga, sidoo kale waxay ku nool yihiin meelaha kale gudaha gurigaaga.

Kuraas kasta oo cusub oo aad keento gurigaagu sidoo kale waxaa geli doonaa dukaanka ama kutaanta sariirta. Waydii shaqaalaha xakamaynta cayayaanka haddii ay jiraan shay aad u baahan tahay inaad iska tuurto. Xataa haddii kuraasta sida kursiga buushka ah uu leeyahay dukhaanka sariirta, shaqaalaha xakamaynta cayayaanka waxa uu awoodaa inuu daweeyo.

Haddii aanad shay iska tuurin, ku buufi rinji ama ku qor "Bed Bugs" guudka shayga iyaddoo ah xarfo waa wayn markaas cidna qaadan mayso oo ma soo gelinayso guriga. Ha soo qaadan kuraas cusub ilaa shaqaalaha xakamaynta cayayaanka ay dhammeeyaan dawaynta gurigaaga oo aad hubto in dukhaanka sariirta inay tegeen.

### SIDEE SAAXIIBDA IYO XUBNAHU QOYSKU ISAGA ILAALIN KARAAN KEENIDA DUKHAANKA SARIIRTA, DHANKA GURIGA ILAA KOODA?

Dukhaanka sariirta waxa uu ka soo baxaa guri ilaa mid kale isagoo saaran dharka qofka ama gudaha boorsada, shandadaha, shandadaha waa wayn, ama shandadaha dharka. Ilaa aad ka tirtirtay dukhaanka guriga gudaha gurigaaga, waxaanu talinaynaa in saaxiibada iyo xubnaha qoyska ay qaadaan tallaabooyinka soo socda markay booqanayaan gurigaaga.

- Ha soo qaadan boorsooyinka, shandadaha, shandadaha waa wayn ama shandadaha dhabarka
- Haddii ay suuragal tahay, iska ilaali fadhiisiga kuraasta jilicsan sida kuraasta buushka ah.
- Waa inay ka saaraan, dhaqaan oo qalajiyaan dharkooda isla markaaba marka lagu noqonayo guriga. Haddii aanad haysan qalabka dhaqa iyo qalajiyaha, shandada sharka oo ku jirta shandada xidhan ilaa la dhaqi karo oo la qalajiyo.

## SIDEEN KU XAKAMEEYAA DUKHAANKA SARIIRTA?

- Hakeenin fareemada sariirta la daadiyay, furaashyada, isbiriinada bogoska ama kuraasta ama qalabka guriga la isku xidhxidho gurigaaga.
- Ka eeg dhammaan kuraasta ama laabta giriga la isticmaalay ama la kiraystay dukaanka guriga.
- Marka aad safrayso, baadh sariirta iyo kuraasta.
- Ku hay shandadaha sagxada iyo sariirta, oo baadh iyaga ka hor inta aanad tegin.
- `Haddii aad ka shakisan tahay dukhaanka sariirta inaad agjoogtay, isla markaaba dhaq oo ku qalaji dharka goobo kullan.

## WAKHTI INTEE LEEG AYUU MULKIILAHU SIINAYAA XIRFAD YAQAANKA MAARAYNTA CAYAYAANKA?

Sharcigu waxa uu u oggolaadaa mulkiiylayaahs guryaha inuu xirfaf yaqaan maaraynta cayayaanku yimaado oo baadho dabaqaaga aad degen tahay.

## SIDEEN U DAWAYN KARAA QANIINYADA DUKHAANKA SARIIRTA?

Ku dhaq aaga qaniinyada saabuubta ku lidka ah jeerimiska si loo yareeyo caanuqa, oo la isaga caabiyo ku dhiirinta xoqida. La xidhiidh adeeg bixiyayaaga daryeelka caafimaadka haddii qaniinyadu ay noqoto mid caabuq leh.

## SIDA FUDUD EE DUKHAANKA SARIIRTU UGU FAAFO QOF ILAA QOF?

Dukhaanka sariirti ma faafaa oo qof ilaa qof kale uma gudbaan caabuqoodu. Si kastaba ha ahaatee, dukhaanka sariirta way qarsoontaa oo waxay ku noolaataa go'yaasha sariirta, dharka, shandadaha, iyo kuraasta. Marka sheeyadan ay soo galaan guriga ama loo qaado aag kale, waxay soo qaadan karaan dukhaanka sariirta.

## INTEE IN LEEG AYA QAADATAA FAAFIDA DUKHAANKA SARIIRTA INAY SOO MUUQDAAN?

Calaamadaha qaniinyada waxay qaadan karaan 14 maalmood inay ka soo baxaan dadka qaarkooda.

## SIDEE DUKHAANKA SARIIRTU U FAAFAAN?

Sababtoo ah dukhaanka sariirta waxaa laga heli karaa gudaha guriga iyo meelaha dad waynaha oo kala duwan, waxaa si fudud dadku ugu qaadan meel ilaa meel. Waxay ku dhuuntaa jeexjeexyada shandada, kiishashka habeenka, go'yaasha sariirta, iyo laablaabka. ee dharka. Sidoo kale waxaa lagu qaadi karaa kuraasta. Badanka dadku ma aqoonsadaan in sidaan dukhaanka sariirta marka ay u safraan meel ilaa meel, aagaga saamaynta markay tagaan. Dukhaanka sariirta khabiiro ayay ku yihiin is qarinta, way qarsoomi karaan muddoo wakhti dheer, oo waxay noolaan karaan xataa iyagoon haysan cuntadda dhiiga ah.

## KUMAA AYAY HELA DUKHAANKA SARIIRTA?

Qof kastaa khatar ayuu ugu jira inuu helo dukjaanka sariirta marka uu booqdo meel uu ku badan yahay. Qof kasta oo int abadan safra oo la wadaaga goobta nolosha iyo meelaha seexashada halka dadka kale ay hore u seexdeen waxa uu khatar sare ugu jiraan in la qaniino iyo ama ay ku faaftay dukhaanka sariirta oo ku bata.

## INTEE IN LEEG AYUU QOFKU SITAA DUKHAANKA SARIIRTA?

Dukhaanka sariirti waxa uu ku noolaan karaan uu ku faafo ilaa inta ay is dhalayaan oo waxay awoodaan inay quutaan aadamaha si mudaysan haddii aanu daawayn xirfad yaqaanka xakamaynta cayayaanka. Kuma noola aadamaha laakiin aadahamaha ayay quutaan.

## KU SAABSAN SHAQADAYADA

Waaxda Adeegyada Baadhitaanka waxay maamulaa oo dhaqan geliyaan  dhismayaasha, guruyaha, caafimaadka, sixada, iyo sharciyada badbaadada ay u xil saareen Dowladda iyo gobolku.  Waxaanu ka koobanahay shan qaybood oo sharciga ah. Hadafkayagu waa waa in la ilaaliyo oo la horumariyo tayada nolosha dhammaan Boston dadka degen. Hiigsigayagu waa inaanu dad waynaha ugu adeegno ilaalinta caafimaadka, badbaadada, iyo degenaanshaha deegaanka ee bulshooyinka degen iyo ganacsiga Bosoton.

## XIDHIIDHADA

ISD Housing Division | **617-635-1010** | **https://www.boston.gov/departments/inspectional-services/inspecting-housing-boston**

